Ha xiranina Xariirta iyo Diibaajka, hana ku cabina Weelasha Dahabka iyo Fidada ka samaysan, hana ku cunina wax xeerooyinka labadaa ka samaysan, waayo Gaaladaa Aduunka wax ku cuna inaguna Aakhiraan leenahay

Cabduraxmaan Binu Abii Laylaa waxaa laga wariyey inay la joogeen Xudayfa oo codsaday in la waraabiyo markaasaa waxaa waraabiyey nin majuusi ah, markuu galaaskii qabtay ayuu ku tuuray isagii, wuxuu yiri: hadii aan la ii diidi lahan mar iyo labo maahee, waaba isaga oo aad moodid inuu leeyahay: sidaa ma sameeyeen, laakiin Nabigaan ka maqlay isagoo dhahaya: "Ha xiranina Xariirta iyo Diibaajka, hana ku cabina Weelasha Dahabka iyo Fidada ka samaysan, hana ku cunina wax xeerooyinka labadaa ka samaysan, waayo Gaaladaa Aduunka wax ku cuna inaguna Aakhiraan leenahay."
[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu u diiday Ragga inay xirtaan dharka Xariirta ah dhaaman noocyadiisa kala duwan. Ragga iyo Dumarkana wuxuu ka reebay inay ku cunaan ama ku cabaan Weelasha ka samaysan Dahabka iyo Fidada. Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu u sheegay inay Mu'uminiitu gaar u yeelan doomaan Maalinta Qiyaamaha, waayo Aduunka ayey uga tageen iyagoo Ilaahay ku adeecaya. Gaaladuse alaabtaa ma helayaan Aakhiro, waayo noloshoodii Aduunka ayey ku soo hor marsadeen wanaagoodii wayna soo isticmaaleen alaabtaas, Ilaahayna way ku caasiyeen.

http://sunnah.global/hadeeth/so/show/2985